

Somaliska




Quseeyso carruurta da'dooda tahay 7 ilaa 15 sano:

Dugsiga aasaasiga iyo dugsiga xilliga firaaqada



Skolverket

Sidaan buu yahay nidaamka dugsiyada iswiidhishka.



Wixi ka bilaawdo markuu canugaada buuxiyo hal sano, wuxuu kuu dhigankara dugsiga xannaanada. Ciyaarta aad muhiim u tahay markey noqoto dugsiga xannaanada. Markuu canuga buuxinaayo 6 sano, bey dhammaan carruurta bilaabikaran fasalka ardeyda lix sano jirka. Dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyda lix sano jirka waa arrin ah tabarruc.

Dhammaan carruurta waxey bilaabaan dugsiga aasaasiga markey gaaraan 7 sano, oo in ey dhigtaan

waa qasab. Sharciga oo waajibaadka dugsiga wuxuu ardeyga qasab ku tahay fasalka 1 ilaa 9, oo waa sagaal sano.

Markaas kadib dhallinyarada waxey saddax sano dhigtan dugsiga sare. Dhammaan xaq bey u leeyihiin iney bilaabaan dugsiga ilaa sanadka ey buuxinaayan 20 sano. Dugsiga sare ardeyga wuxu u diyaarin inuu dhigankaro waxbarasho jaamacadeed, ama toos shaqo u bilaabo.

Dhammaan carruurta way dhigtaan dugsiga aasaasiga

Dugsiga aasaasiga in la dhigto waa qasab Iswiidhan. Dhammaan carruurta waxey dhigtaan sagaal sano. Inta badan carruurta waxey bilaabaan fasalka kowaad xilliga deyrta ee ay buuxinayaan 7 sano. Sanadka waxbarashadu waa laba qeybood, mid waa xilliga deyrta, midna waa xilliga gu`ga. Hadii ay canugaaga maskaxdiisu gaabiso wuxu markaas dhigan karaa dugsiga ardeyada maskaxdoodu gaabiso, oo markaas la siin waxbarasho canuga awoodiisa la waafajiyay. Dugsigaasna waxa uu yahay waxaa ka heleysaa waraaqda oo macluumaadka arrintaas ku saabsan.

Intaan ka aheyn dugsiga aasaasiga oo caadiga

ah waxa kale oo jira dugsiga gaarka ah oo ey dhigtaan carruurta qaarkood, tusaale ahaan kuwa aan wax maqal ama arag, iyo curyaanimooyinka kale. Carruurtaasi waxey helaayaan waxbarasho ku habboon. Dugsiga gaarka ah waxaa la dhigtaa 10 sano.

Dugsiga aasaasiga ahi waa lacag la`aan. Taasna micnaheedu waxey tahay inaad adigu u baahneyn inaad waxbarashada, buugaagta iyo qalabka waxbarashadu midna aanad lacag ka bixin. Cuntada xitaa waxa lagu cuni lacag la`aan. Ardeyada waa in ay helaan daryeelka caafimaadka ardeyada, shaqaalaha talo bixinta waxbarashooyinka iyo shaqooyinka iyo rugta kutuubta ee dugsiga.





Hadaf waxbarasho oo mideysan

Adigu waxaad dooran kartaa dugsi ey degmadu mas' uul ka tahay ama mid gaar loo leeyahay. Kaad rabtid dalbo, shuruudaha aqoonta iyo hadafka aqoonta waa isku mid. Dhammaanba dugsiyada waxaa maamulaaya sharciga dugsiyada iyo manhajka waxbarashada.

Aqoonta canugaaga la siinaayo waxuu kale oo uu ku baran sida dadka kale loo fahmi karo loo'ana dhaqmo. Dhammaan ardeyda waa in ey bartaan sida ey deegaankooda u xushmeyn lahaayeen. Waxa la bari sinaanta ay dadku u siman yihiin xuquuqda, jinsi ahaan, diin ahaan, curyaanimo ama han-

naan jecel ahaan. Dimuqraadiyada iyo xuquuqda bani`aadinimka isku si waa in loo xushmeeyaa markey noqoto dugsiya ama nolosha bulshada wadanka.

Miyuu canugaada luqadiisa hooyo eheyn iswiidhish? Miyaa luqadaas isku la wada hadashiin markaa guriga joogtiin? Hadii ey sidaas tahay canugaada wuxu xaq u leeyahay in loo dhigo luqadiisa hooyo. Waxbarashada xisadaas waxey noqon karta mid ardeyga luqad ahaan u soo dalbankaro, ama ku badalan karaa xisada doorashada ardeyga ama oo dhigan karaa markey maalintaas saacadaha xisadaha ey dhammaadaan.

Shahaado bixin laga bilaabo fasalka 6

Dugsiga wuxu bixin shahaado laga bilaabo fasalka 6. Markaas kadib canugaaga waxa la siin shahaado deyr iyo gu` kasta, fasalka sagaalaad ayaana la siin doonaa shahaadada ugu dambaysa. Shahaadada ardeyga la siiyo waxey muujin ardeygu waxa uu bartay iyo waxa dugsiyada ka rabay faraqa u dhaxeeya. Hadii ey ardeyga ku adag tahay inuu fuliyo shuruudaha aqoonta ee dugsiyada, waa inuu helaa caawimaad gaar ah.

Waa shahaadadaas tan uu canugaagu isticmaalaayo markuu dalbanaayo dugsiyada sare. Shuruudaha

tan ugu hooseyso waa inuu ardeygu siddeed maado shahaado ka haystaa, ama labo iyo toban maado hadii uu rabo inuu bilaabo barnaamijyada dugsiyada sare ee jaamacada kuu diyaarinaya.

Shahaadooyinka waxey kala yihiin lix darajo: A, B, C, D, E iyo F. A baa ah shahaadada ugu sareysa, E baa ah shahaadada tan ugu hooseysa oo ah waa ku baastay. Shahaadada F micnaheeda waxey tahay maadada ma aadan ku baasin.

Shuruudaha aqoonta bey shahaadada ku xirantahay

Dugsiga waxaa u yaal shuruudo ku saabsan aqoonta laga rabo in ardeyga ugu yaraan uu fuliyo, oo waa shuruudahaas waxa la adeegsanaayo marka ardeyga la siinaayo shahaado. Dhammaan dugsiyadu shuruudahan weey ka wada siman yihiin. Hadii uu ardeyga halis ugu jiro inuu gaari waayo aqoontii laga rabey wuxu xaq u leeyahay caawimaad gaar ama dheeraad ah.

Imtixaamada qaranka waxa la bilaabi in laga qaado ardeyada wixi ka bilaawdo fasalka 3, maa-dooyinka qaarkood. Imtixaamada qaranka waxey caawinayaan in macallimiintu ardeyga aqoontiisa si

caddaalad ah u qiimeeyaan, oo ardeygu sidaasna ku helo shahaado caddaalad ah.

Ugu yaraan lixdii bilood hal mar baa adiga iyo canugaagu la wada kulmeysiin macallinka. Kulankaas waxa lagu magacaabaa kulanka horumarinta aqoonta ardeyga. Waxaad markaas ka wada hadley-siin meesha xaalada waxbarashadu oo canugaagu marayso iyo canugu hadii uu wax ka tabanaayo dugsiga. Adiga iyo canugaaga waxa talo iyo fikrado la idinka siin sidii aad canuga uga caawin lahaydeen waxbarashadu intu guriga joogo.



Dugsiga aasaasiga ahi wuxu leeyahay xeerar muhiim ah

Dugsiga aasaasiga in la dhigto waa qasab. In xiisadaha laga qeyb-qaato waa muhiim maadaama ey tahay meesha waxbarashada laga helaayo. In canugaagu yimaado dugsiga oo uu ka qeyb-qaato xiisadaha waa mas`uuliyada adiga waalid ahaan ku saaran. Maalmaha waxbarashada oo dugsiga waa isniin ilaa jimce. Sabti, axad iyo maalmaha kale oo fasaxa ah lama dhigto dugsiga. Xilliga xagaaga iyo ciida miilaadiga masiixiga dugsiyadu waa fasax muddo dheer.

Hadii uu canugaagu u baahanyahay inuu ahaado fasax waa inaad la xiriirtaa maamulaha dugsiga. Isla qofkaas baad la xiriiri hadii aad rabtid in canugaaga waxbarashada qeyb ka mid ah laga daayo. Waa in markaasna la imaataa sababo lama huraan ah, waana in eynan aqoonta laga rabo ardeyga wax u dhimeyn.

Hadii uu canugaagu ka maqnaado dugsiga adigoo ogeysiin waa in ey dugsigu isla maalintaas warbixinta maqnaanshaha adiga ku soo gaarsiiyaan. Maqnaansho sabab la`aan ah ardeyga shahaadadiisa baa lagu qori.

Sidey dadka da`doodu yar tahay ey horumar u suubin karaan, oo ey u noqon karaan shaqsiyo xorriyad ku noolaan kara, waa in la isku garab wadaa xorriyada shaqsiga iyo mas`uuliyada shaqsi kasta saaran. Dugsigu aqoon kaliya ma dhigo, ee wuxu xitaa baraa xeerarka deegaanka iyo fikradaha aasaasiga oo ey nolosha ku dhisan tahay. Ku xad gudub waa in laga hortagaa, wada sinaanshaha la badiyaa. Waxa kale oo muhiim ah in ardeygu dareemo kalsooni iyo deganaansho uu wax ku barto. Hadii uu ardeygu akhlaaq aan fiicneyn fasalka dhaxdiisa ku suubiyo, macallinka baa ardeyga ka codsanaayo inuu arrintaas wax ka badalo. Hadii uu ardeygu sidaas wax ku fahmi waayo, macallinku xaq buu u leeyahay inuu ardeyga fasalka ka saaro, hadii ey sidaas dhacdo ardeyga waa inuu dugsiga waqti ku qaataa maalintaas marka ardeyada kale la fasaxo. Laakiin macallinku wuxu isku dayayaa gacanta koowaad inuu asaga iyo ardeygu isku af-gartaan sidey arrintaas ey isku la xalin lahaayeen.

Dalbashada dugsiga

Adiga iyo canugaada baa isla soo dalbaneysiin dugsiga aad rabtiin, ha ahaado mid ku yaal degmada aad ku nooshiin ama bannaankeeda. Degmada aad ku nooshahay waxey leedahay dugsiiyo ey mas'uul ka tahay, laakiin wey jiraan xitaa dugsiiyo gaar loo leeyahay. Dhammaan dugsiiyada waxaa lagu dhigtaa lacag la'aan, taasna micnaheeda waxa weeyi in waxbarashadu tahay lacag la'aan.

Dugsi gaar loo leeyahay waxaa mas'uul ka ahaan kara shirkad, hey'ad samafal ama urur. Dhammaan bulshada buu ka wada dhaxeeyaa, oo markey noqoto

aqoonta iyo shuruudaha aqoonta waa sida dugsiiyada ay degmadu mas'uul ka tahay oo kale.

Dugsiiyada qaarkood wax baa gaar u noqda. Tusaale ahaan waxey lahaan karaan fasalo ciyaaraha ama waxbarasho gaar bey xooga saaraan.

Gacanta koowaad canugaagu waxaa boos laga siin dugsi ey degmadu mas'uul ka tahay, oo gurigaagu u dhow. Laakiin hadii uu dugsi kale boos ka bannaan yahay waad dalban kartaa, mid degmo ama mid gaar loo leeyahay.



Dugsiga xilliga firaaqada waxa la tagaa markay xiisadaha dugsigu ey dhammaadan

Adiga waalidka ah waxaad heleysaa fursad aad ku shaqeysan kartid ama waxbarasho ku dhigan kartid. Markaasna canugaagu wuxu dhigan karaa dugsiga xilliga firaaqada markey xiisadaha dugsigu ey maalintaas u dhammaadaan. Dugsiga xilliga firaaqada caadiyan wuxu daris la yahay dugsiga. Shaqaalaha dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga xilliga firaaqada wey isla wada shaqeeyaan si ey ciyaalku u dareemaan kalsooni iyo farxad. Dugsiga xilliga firaaqada waxey shaqadoodu tahay in ardeyada koox ahaan u siiyaan waxbarasho ardeyga shaqsiyadiisa horumarineyso.

Dugsiga xilliga firaaqadu carruurta waxey qaabilaan maalinta uu canugu bilaabo fasalka ardeyda lix sano jirka ah ilaa 13 sano ey ka buuxiyaan. Dugsiga iyo dugsiga xilliga firaaqadu waxey ku kala duwan yihiin in dugsiga xilliga firaaqada dhigashadiisa ey lacag tahay. Degmada ayaana mas'uul ka ah oo go'aamineysa inta ay lacagtaasi noqonayso.

Carruurta da' doodu tahay 10 ilaa 12 sano waxey ka qeyb-qaadan karaan dhaqdhaqaaqa xilliga firaaqada. Taasna waxey kuu ahaan kartaa xal wanaagsan hadii aadan shaqeyn ama waxbarasho dhigan. Adiga iyo canugaada baa iska go'aanka iska leh inaad ka qeyb-qaadataan iyo in kale.

Waxaad tahay muhiim

Adiga ayaa ah qofka canugaagu ugu dhow. La soo xiriir canuga macallinkiisa ama qofka aad dugsiga xiriirka la leedahay hadii aad wax ka walwalsan tahay ama wax su`aal ah hayso. Lixdii bilood hal mar baad kulanka horumarinta waxbarashada ardeyga la yeelan macallinka. Aad bey muhiim u tahay in dugsiga iyo gurigu ey si fiican u wada shaqeeyaan. Taasina waa fursad fiican oo aad ka wada sheekeysan kartiin canugaaga hadii uu ku faraxsan yahay dugsigiisa iyo xaalada dugsiga sida ey tahay.

Kulanka waalidiinta waxa kulma macallinka iyo dhammaan waalidiinta kale, oo markaasna waxa laga wada hadli xaalada dugsiga iyo shaqaalaha waxa ey ku tala jiraan in ey suubin doonaan. Adiga su`aalahaaga iyo fikradahaaga inaa la qeybsatid waa lama huraan!



Beställningsuppgifter:

Fritzes kundservice

106 47 Stockholm

Telefon: 08-690 95 76

Telefax: 08-690 95 50

E-post: skolverket@fritzes.se

Beställningsnr: 13:1374

Bilder: Bildarkivet.se, Michael McClain,

Matton, iStock

Illustratör: Helena Halvarsson

Grafisk produktion: Jupiter Reklam

Tryck: Åtta45

Skolverket

skolverket.se/nyanlanda